Region Stockholm

# Maxaa dhaca marka uu uurka yahay mid caadi ah oo uu gaaro isbuuca 41 + 0?

Shantii uur hal mid ayaa gaara isbuuca 41+0. Badanaa foosha iyada ayaa iskeed isaga billaabata maalmaha ugu soo dhow. Haweenka uurka leh waxaa lagula taliyaa in ay foosha bilaabato ugu dambeyn dhammaadka isbuuca 41. Khatarta laga qabo in uu ilmuhu ku dhinto ilmo galeenka isbuuca 40+6 wey yartahay (qiyaastii 0,05%) laakiin sare ayay u kacdaa isbuuca 42+0 xoogaa ayey u yara kacdaa:

- Marka uu ilmuhu sidii la rabay u korin
- Marka aad sugeysid/sugeysaan cunugga koowaad

Iyo marka qofka uurka leh:

- Uu jiro 40 sano ama ka weyn yahay
- Uu cayilkiisu ka weynyahay BMI ≥ 30 $kg/m^2$ (obesitas)
- Uu ku dhashay Afrika dhanka koofurta ka xigta Saxarada.

Cilmi baaritsa waxaa lagu ogaaday in in ay jiraan faaidooyin caafimaad in foosha la billaabo billowga isbuuca 41, khaasatan marka ay khatarta laga qabo inuu ilmuhu uurka ku dhinto ay xoogaa sarreyso. Haweenka uurka leh ee qaba mid ka mid ah waxyaabaha khatarta keeni kara ee kor lagu soo xusay waxaa la siinayaa fursad ah in fooshooda la billaabo billowga isbuuca vecka 41.

Umulisada ayaa jawaab u direysa qeybta foosha ee isbitaalka waqtiga booqashada isbuuca 40 haddii adigaaga uurka leh aad qabto khatarahaas iyaga ah. Haddii uu shaki idinkaga jiro billaabidda foosha isla markaana codsanaysaan in aaad dhakhtar la kulantaan si loo sameeyo qiimeyn gaar ah, umulisada ayaa ku qoreysa jawaabta. Qeybta foosha ee isbitaalka ayaa dhanka taleefan ka ama dhanka dijitaalka kaala soo xiriiri doonto ugu dambeyn isbuuca 40+6. Haddii aad codsaneyso/codsaneysaan in fooshaada la billaabo waqti ayaa la idiin qabanayaa maalmo gudahood. Hadba sida ay saxmadda waaxda foosha tahay ayaa keeni karta in waqtiga dib loo dhigo 1-2 maalin.

Haweenka uurka leh ee aan wax khatar ku keeni kara uurkooda laheyn iyo kuwa uurka leh ee qaba waxyaabo khatar u keeni kara uurka laakin raba in ay sugaan in fooshooda la billaabo waxaa loo dirayaa raajo marka ay yihiin billowga isbuuca 41 si loo kontoroolo in uuu cunugga si caadi ah u korayo iyo in biyaha ilmo galeenka ay yihiin noormaal. Haddii ay wax kasta sidii la rabay ku yihiin raajada waxaa loo sheegayaa in haddii ay rabaan foosha la billaabi karo dhammaadka 41 (sida caadiga ah isbuuca 41+5). Waqtiga la billaabayo idinka ama umulisada ayaa qabanaya iyada oo la soo wacayo qeybta foosha ee isbitaalka isbuuca 41+3. Hadba sida ay saxmadda waaxda foosha tahay ayaa keeni karta in waqtiga dib loo dhigo 1-2 maalin. Haddii ay wax ka weecdaan sida laga rabay marka raajada la qaadayo, waxaa isla maalintaas imaaneysaa/n qeybta foosha ee isbitaalka si loo qiimeeyo marka ay tahay in foosha la billaabo.

# Waajib miyaa in foosha la billaabo isbuuca 41?

Maya, adiga/idinka ayaa dooranaya haddii aad rabtaan in aad sugtaan illaa isbuuca 42+0.

# Ma jiraan waxyeello ka imaan kara in foosha la billaabo isbuuca 41?

Cilmi baarista ma sheegin waxyeello la taaban karo oo ka imaan kara in foosha la billaabo billowga isbuuca 41, laakiin billaabidda foosha waxey badanaa qaadataa waqti dheer, khaasatan haddii aad tahay marka ugu horreyso ee aad dhaleyso. Haweenka uuurka leh oo hore ciyaalka lagu qalay marka ay dhaleysay qeyb kama aha cilmi baarista lagu sameeyay faaiidada iyo waxyeellada sidaas darteeed waxaa la boorrinayaa in qiimeyn shakhsi oo gaar ahaaneed in la sameeyo markaas oo kale. Waxa la rabo waa in ay foosha iskeed isaga billaabato ama in la billaabo ugu dambeyn dhammaadka isbuuca 41 waxaana sidoo kale ay arrintaan khuseysaa haweenka uurka leh ee hore marka ay dhalayeen carruurta lagu qalay.

## Sidee ayay u dhaceysaa marka foosha la billaabayo?

Waxaa jira laba qaab oo la isticmaalo si loo billaabo foosha. Qaabka la isticmaalayo waxuu ku xiranyahay waxyaabo badan waxaa la go'aaminayaa marka aad qeybta foosha timaaddo.

- Haddii afka hore ee minka uusan bislayn waxaa dhici karta in lagu siiyo daawo keeneysa in uu afka minka uu jilco isla markaana is furo, sida caadiga ahna in marar badan daawo lagu siiyo 1-2 maalin iyo habeen illaa ay xanuunnada si fiican kuu qabanayaan.
- Qaabka kale waa in lagu siiyo kateetar buufin camal ah. Waa tubo jilaac ah oo la gelinayo afka minka iyada oo loo sii marayo xubinta taranka kadibna waxaa lagu shubayaa dareere. Buufinkaas dareeraha laga buuxiyay ayaa wuxuu ballaarinayaa ilmo galeenka.
- Marka uu ilmo galeenka bisil yahay waxaa dhici karta ay umulisadu ama dhakhtarku dalooliyaan xuubka hore si ay biyaha u yimaadaan.. badanaa waxaa markaas kadib loo baahan yahay faleenbo billaabaya xanuunka si ay foosha u billaabato.

Inta waqti ay qaadaneyso in la billaabo foosha waxay hadba ku xirantahay qofka sida uu yahay. Waxaa qaadan kartaa dhowr saacadood ama dhowr maalmood. Haddii uu afka hore ee ilmo galeenka aanan bisleyn waxaa dhici karta in la isticmaalo daawooyin iyo qaabka buufinka inta ay macquul noqoneyso in la dalooliyo xuubka hore. Si la mid ah fool waalba waxaa lagaa caawin karraa in lagu siiyo xanuun baabi'ye si aad u nasato una seexato. Warbixin dheeri ah waxaad ka heleysaa bogagga internetka ee qeybta foosha ee isbitaalka iyo bogga 1177.

## Halkee ayaan la aadaa haddii aan su'aalo qabo?

Adiga7idinka waxaa mar walba la hadli kartiin umulisadiina haddii aad su'aalo qabtiin ama aad u baahan tihiin warbixin dheeri ah si aad doorasho u sameysaan.